

Ballanqaadka Akhrinta Fasalka Saddexaad

Kor-u-soo-qaadista ee Ardayda Fasalka Saddexaad ee La Celiyay

Agoosto 2017

Ballanqaadka Akhrinta Fasalka Saddexaad ee Ohio waa barnaamij lagu aqoonsanayo ardayda kindargaardenka ilaa fasalka 3-aad, ee akhrintoodu danbayso. Iskuuladu waxay bixiyaan caawinaad iyo taageero si ay u xaqijiyaan in ardaydu akhrinta ku guulaystaan marka la gaaro dhammaadka fasalka saddexaad. Daraasad ayaa si cad u muujinaysa in carruurta aan ku fiicnayn akhrinta heerka saddexaad in afar jeer ay u dhaw yihiin inay qalinjabin wakhtiga loogu talogalay.

Hagaha Guud

Degmooyinka iyo iskuuladu waa inay dajiyaa siyaasad ku saabsan ardayda la celiyay ee fasalka saddexaad in sanadka dhexdiisa kor loogu qaado fasalka 4-aad haddii ay muujiyaan in akhrintoodu gaartay ama ka sarrayso heerka fasalka. Ardayda la celiyay waa arday lagu qoray fasalka saddexaad, in kastoo ay sanadkii la soo dhaafay dhigteen fasalka saddexaad, xataa haddii waxbarasho sare ay qaadanayaan maadooyinka qaar ay natijo fiican ka keeneen, ilaa ay ku dallacaan siyaasaddan ay fasalka afraad ugu gudbayaan.

Su'aalo Inta Badan La Iswaydiyo

WAA MAXAY UJEEDADA SIYAASADDA KOR-U-SOO-QAADKA SANADKA DHEXDIISA AH?

Ujeedada siyaasadda kor-u-soo-qaadka sanadka dhexdiisa ah waa in ardayda la celiyay ee fasalka saddexaad oo muujiyay inay akhrin karaan heerka fasalkooda ama ka sarreeya la awoodsiiyo inay u gudbaan fasalka afraad inta lagu jiro sanad dugsiyedka la celiyay. Siyaasaddan waxay u oggolaanaysaa in ardayda helay adeegyo tayo sare oo la muujin karo oo ay degmadu bixiso inay u gudbaan fasalka afraad isla marka ay muujiyaan inay heerkooda ama ka sarreeya akhrin karaan.


ARDAYDA KOR MA LOOGU QAADI KARAA SIYAASADDA DALLACSIINTA DEGMADA EE SANADKA DHEXDIISA KA HOR INTA AAN LA GAARIN SANADKA DHEXDIISA?

Haa, haddii tan lagu cayimay siyaasadda kor-u-soo-qaadka sanadka dhexdiisa. Degmooyinka waxaa lagu dhiirigaliyya inay sameeyaan siyaasado kor-u-soo-qaad sanadka dhexdiisa ah oo oggolaanaya horumar iyo diyaar ahaan qofka gaar u qiimaynaya. Haddii arday lagu celiyay fasalka saddexaad muujiyo inuu akhrin karo ama inay akhrin karto heerka fasalka ama ka sarreeya, sida ku cayiman siyaasadda u daggan degmada, oo ay siyaasadda degmadu oggolaanayso, waa in ardayga fursaddan la siiyaa. U gudbinta ardayda fasalka afraad isla marka ay muujiyaan inay diyaar u yihiin, waxay kor u qaadysaa fursadda ay ardaydu uga faa'iidaysanayaan fasalka afraad.

HADDII SIYAASADDA DEGMADU AY KU DHISAN TAHAY KU QIIMAYNTA INUU ARDAY MUUJIYO INUU DIYAAR U YAHAY AKHRINTA HEERKA FASALKA AMA KA SARREEEYA, DEGMADU MA

ISTICMAALI KARTAA BUUNDOOYINKA HEERKA GUDBISTA (ADJUSTED CUT SCORES) INTA SANAD DUGSIYEEDKA LAGU JIRO (TAAS OO AH, IN BUUNDADA HEERKA GUDBISTU AY KOR U KACAYSO MARKA SANADKU SII SOCDABA)?

Haa, haddii tan lagu cayimay siyaasadda degmada ee kor-u-soo-qaadka sanadka dhexdiisa. Hadafka Ballanqaadka Akhrinta Fasalka Saddexaad waa in la xaqijiyo in ay ardaydu akhrin karaan ugu yaraan heerka fasalka saddexaad inta aysan u gudbin fasalka afraad. Hase ahaatee, waxaa sidoo kale muhiim ah in ardayda lagu celiyay fasalka saddexaad loo diyaariyo inay ku guulaystaan fasalka afraad. Siyaasadda degmada u gaarka ah waa inay wakhtiyoo kala duwan oo sanad dugsiyedka dhexdiisa ah tixgaliso adkaanta manhajka fasalka afraad, iyo waxyalo kale marka ay cayimayso sida ay u qeexayso "akhrinka heerka fasalka ama ka sarreeya"



SIYAASADDA KOR-U-QAADISTA SANADKA DHEXDIISA DARTEED, DEGMOOYINKA MA LOOGA BAAHAN YAHAY INAY ISTICMAALAAN IMTIXAANADA DOWLADDA, AMA QIIMAYN AKHRIN KALE OO LA OGGOL YAHAY, SI AY U CAYIMAAN IN ARDAYDA LA CELIYAY AY DIYAAR U YIHIIN INAY AKHRIN KARAAN HEERKA FASALKA AMA KA SARREEEYA.

Maya. Siyaasadda degmadu waxay cayimaysaa sida loo cabbiro in ardayda fasalka saddexaad ee la celiyay ay muujinayaan inay "akhrinayaan heerka fasalka ama ka sarreeya." Waaxda Waxbarashada ee Ohio ma dajiso liis qiimaynno oo loo dajiyay siyaasadda kor-u-soo-qaadka sanadka dhexdiisa, degmooyinkanaloo*gama baahnainay* isticmaalaan qiimayn akhrin kale oo la aqoonsan yahay ujeedadan darteed. Hase ahaatee, Waaxdu waxay ku dhiirigalinaysaa isticmaalka habab shaqaynaya oo lagu kalsoonaan karo, laakiin aan ku ekayn, Cabbirka Buuxda ee Fasalka Saddexaad oo ay dowladdu dajisay, ama hababka la aqoonsan yahay si loo cayimo kor-u-qaadista sanadka dhexdiisa ah. Waxaa intaas dheer, in dagmooyinku ay dagsan karaan siyaasado u gaar ah oo isticmaala caddaymo kale, oo dhinac socda qiimaynta akhrinta ee caadiga ah, marka ay qiimaynayaan in ardayga dib loo celiyay uu muujinayo inuu akhrin karo ama ay akhrin karto heerka fasalka ama ka sarreeya. Caddaymo kale oo loo isticmaali karo hab lagu kalsoonaan karo oo lagu cabbiro waxaa ka mid ah laakiin aan intaas ku ekayn, kuwa soo socda:

- Caddaymaha la aruuriyay iyo horumarada la sameeyay inta xagaaga (fasaxa iskuulka) lagu jiro; iyo/ama
- Soojoodinta macallinka (macallimiinta) ardayga ama adeeg-bixiye kale oo ka baxsan oo salaysan caddayn dokumiinti ahaan loo aruuriyay oo sheegaysa akhrinta ardayga, oo qayb ka ah dokumiintiga soobandhigga akhrinta.

DEGMADU MA INAY KAYDISAA SIDA ARDAYGU KU GAARAY SIYAASADDA DEGMADA EE KOR-U-QAADIDDA SANADKA DHEXDIISA?

Haa. Degmadu waa inay kaydisaa sida uu ardaygu u soo buuxiyay siyaasadda degmada ee sanadka dhexdiisa, iyo taariikhda ay kor-u-qaadidda sanadka dhexdiisa ee isla deegaankaas ay dhaqangalayso, oo ay dagmadu ku kaydinayso natijjooyinka ardayda kale (oo ah, faylka aruurinta).

SIDEE AYAY DAGMADU EMIS (NIDAAMKA MAAMULKA WARBIXINTA WAXBARASHADA) UGU SOO GUDBISAA KOR-U-QAADKA SANADKA DHEXDIISA EE ARDAYGA FASALKA SADDEXAAD EE LA REEBAY?

Ardayda la celiyay ee fasalka saddexaad oo loo dallacsiiyay fasalka afraad inta lagu jiro sanadka celinta waxaa EMIS ka (Nidaamka Maamulka Warbixinta Waxbarashada) loogu soo gudbiyaa Heerka Fasalka "04", iyo taariikhda ay kor-u-qaadka sanadka dhexdiisa. Tusaale ahaan, haddii arday la celiyay oo fasalka saddexaad uu soo buuxiyo waxa ay ka rabto siyaasadda kor-u-qaadidda degmada ee sanadka dhexdiisa, oo loo dallacsiiyo fasalka 4, Nofembar 1, 2017, ardayga waxaa loo soo qorayaa inuu yahay Heerka Fasalka "04", laga bilaabo Nofembar 1, 2017.

DEGMOOYINKU MA INAY ADEEGYADA ARDAYGA SII WADAANBAA KA DIB MARKA KOR LOO SOO QAADAY?

Maadaama buundada waddanka ee kor-u-uqaadiddu ay ka hoosayso heerka buundada "aqoon-fiican", degmooyinka iyo iskuuladu waa inay ardayda siiyan adeegyo taageero ah; oo loogu talagalay ardayda loo dallacsiiyay fasalka afraad laakiin wali lahayn aqoon-fiican oo ku habboon sida lagu qeexay ORC 3301.0711(D)(1).